



HAY'ADDA QAXOOTIGA IYO
BARAKACAYAASHA QARANKA

NATIONAL COMMISSION FOR
REFUGEES AND IDPS (NCRI)

WAXQABADKA
NCRI

AGOOSTO 2022

AGOOSTO 2024



Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka (NCR) waxa uu waajibaadkeeda yahay ka shaqaynta iyo isku xirka hawlaha loogu talagalay gargaar-sugayaasha, dejinta istiraatiijiyado iyadoo lala kaashanayo daneeyayaasha Qaran iyo kuwa Caalamiga, hirgalinta xal waara, ku matalida dowladda ee wadaahadallada farsamo, xaqiijinta dokumentiyada qaran, abuuridda barnaamijyo dib-u-dejin, is dhexgal bulsho, raadinta deeqaha iyo kaalmooyinka loogu talagalay gargaar-sugayaasha iyadoo la ilaalinayo xuquuqda insaanka ee caalamiga ah.



WAXQABADYADA HAY'ADDA



1. Diirwaangalin



2. Istaraatiijiyadda
Cusub



3. Hagida iyo
Wacyigalinta
Bulshada



4. Ballanqaadyada
Madasha Qaxootiga
Adduunka ee
Dowladda Soomaaliya
(GRF Pledges)



5. Sharciyada
Hay'adda




ADEEGYADA HAY'ADDA

Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxaa ay ku guulaysatay gaarsiinta adeegyo waxtar u leh Qaxootiga, Maggangalyo-Doonka, Barakacayaasha iyo Dadka soo Guryo noqday kuwaas oo isugu jira Diiwaangalin iyo Taakuleyn.



DIIWAANGALIN

Hay'addu waxa ay diiwaangalisay in ka badan **970kun** oo qof, kuwaas oo isugu jira Qaxootiga, Maggangalyo-Doonka, Barakacayaasha iyo Dadka soo Guryo noqday.





WADATASHI

Si looga dhabeeyo hirgalinta howlahan waxaa ay Hay'addu sameesay wadatashiyo Lagu dhisayo Istaraatiijiyadda, kuwaas oo lagu saleenayo soojeedinta dhammaan Hay'adaha kula mataaneysan shaqooyinka Hay'adda.

ISTARAATIJIYADDA CUSUB

Hay'addu waxaa ay ku guuleysatay hal-abuuridda iyo hindisidda Qorsha Qaran ee Istaraatiijiyadda Illaalinta, Taakuleynta, iyo Xalka-waara ee Qaxootiga, Maggangalyo doonka, Barakacayaasha, iyo Dadka soo guryo noqday.





YOOLALKA ISTARAATIJIYADDA




Assist

Taakuleynta Qaxootiga,
Barakacayaasha iyo Dadka soo
guryo noqday.



Protect

Ilaalinta Xuquuqda
Qaxootiga, Barakacayaasha
iyo Dadka soo guryo
noqday.



Find Sustainable Solutions

U helidda Xal waana Qaxootiga,
Barakacayaasha iyo Dadka soo
guryo noqday.



HAGIDA IYO WACYIGALINTA BULSHADA

Hay'adda oo ka turjumeysa baahida loo qabo kordhinta wacyiga bulshada ay u adeegto ayaa sameysay hanaan wacyigalineed oo sare loogu qaadayo fahamka bulshada Qaxootiga, maggangalyo-doonka, Barakacayaasha, Iyo Dadka soo guryo noqday.

Hay'adda ayaa qabatay bamaamijyo saldhig u ah wacyigalinta bulshada kuwaas oo qaar kood looga faa'ideystay Munaasabadaha Caalamiga ah.





MAALINTA QAXOOTIGA ADDUUNKA

Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxay xustaa sanad walba Maalinta Qaxootiga Adduunka oo ku asteysan 20ka June, waxaana hay'addu ku soo bandhigtaa guulaha laga gaary adeegyada looqabto Qaxootiga iyo Xirfadahooda Shaqo, dhaqan iyo Ganacsi ay ku leeyihiin gudaha dalka, Hay'addu waxay isugu yeertay marti ka kala socotay Daneeyayaasha Arrimaha Qaxootiga, Dowlada Soomaaliya, Maamul Goboleedyada, Bulshada Qaxootiga ah iyo Qaar kamid ah Magangalya doonka ku nool Wadanka.





BALLANQAADYADA MADASHA QAXOOTIGA ADDUUNKA EE DOWLADDA SOOMAALIYA (GRF PLEDGES)

1

Dib U Eegis

Hay'adda waxaa ay sameysay dib u eegista ballanqaadyadii 2019ka Madasha Qaxootiga Adduunka ay ka soo qaaday DFS.

2

Wadatashi

Hay'adda waxaa ay sameysay wadatashiyo ku saabsan horumarinta ballanqaadyada Madasha Qaxootiga Adduunka, kuwaas oo lala yeeshay dhammaan daneeyayaasha Amimaha Qaxootiga.

3

Dardargalin

Hay'adda waxaa ay qabatay kullamo lagu dardargalinayo ballanqaadyadii Madasha Qaxootiga Adduunka ee 2023da, waxaana lagu jaangooyay 6 bil oo aasaas u ah.



SHARCIYADA HAY'ADDA.

DHAMMAADAY

**Ansixinta
Sharciga
Qaxootiga**



SOCDA...

**Dhaqangalinta
Sharciga
Qaxootiga**



SOCDA...

**Dhismaha
Guddiga
Go'aan ka
Gaarista
Qaxootiga
(RSD)**



SOCDA...

**Shariiga
Barakacayaasha
oo akhrinta ugu
danbeysay ee
Baarlamaanka
JFS maraya**



HAY'ADDA QAXOOTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA

X @ncrisom

f facebook.com/ncrisom

 **www.ncri.gov.so**

 **KM5, Makka Almukarama Road**